

Taageerada Guriga Lagu Baxsho ee loogu talagalay Dadka Qaba Naafanimada Garaadka iyo Korriinka

Adiga ama xubin qoyskaaga ka mid ah ma qabtaan naafanimada garaadka ama korriinka (I/DD)? Ma waxaad ku nooshahay gurigaaga ama kan qoyskaaga?

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) ee Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (ODHS) ayaa halkan kuu jooga. Waxaad haysataa saddex qaab oo aad taageero ugu heli karto guriga dhexdiisa. Iyadoo aan loo eegayn midka aad doorato, waxaad helaysaa:

- **Taageerada guriga lagu baxsho:** Shaqaaluhu waxay kaa caawinayaan inaad ku noolaato nololsha aad rabto.
- **Dooqa iyo xakamaynta:** Dooro cidda ku caawinaysa iyo sida ay kuu caawin karaan.
- **Badqabka ayaa ahmiyadda koowaad leh:** Dhammaan shaqaaluhu waxay maraan baaritaanada sooyaalka nololeed waxayna buuxiyaan xeerarka aasaasiga ah.
- **Xasillooni maskaxeed:** Danwadaagtayadu waxay maareeyaan mushaarka, markaa uma baahnid inaad adigu sidaasi sameyso.
- **Ixtiraam:** Shaqaaluhu waa inay si caddaalad ah kuula dhaqmaan oo ay ixtiraamaan dooqyadaada.

Wax badan ka ogow ikhtiyaarada aad haysato ee ku yaala dhabarka dambe ee warqaddan iidhehda ah.



Wax badan ka ogow mareegtayada:

<https://www.oregon.gov/odhs/idd/Pages/in-home-supports.aspx>

Kala dooro saddexda ikhtiyaar ee bixiyaha taageerada guriga lagu dhex baxsho. Mid walba waxaa u sugnaaday heer taageero oo kala duwan

Isku-duwaha adeegyadaada ama wakiilkaaga gaarka ah kala hadal ikhtiyaarada aad haysato. Dooro waxa adiga kuu fiican.

Shaqaalaha Taageerada Gaarka ah

Waxaad tahay loo-shaqeeyaha.

Shaqaalaysiinta: Waxaad wareysi la yeelanaysaa oo aad qoraysaa shaqaalahaaga.

Maareynta taageerada: Waxaad diyaarinaysaa jadwalka waxaadna la soconeysaa shaqaalahaaga. Haddii loo baahdo, waxaad heli kartaa taageero.

Tababar iyo kormeer: Shaqaalaha ayaa ka soo qaybgalaya carbiska shaqo ee waajibka ah. Waxaad baraysaa baahiyahaaga iyo yoolalkaaga.

Wakaaladda Moodada Loo-shaqeeyaha

Wakaaladda iyo adiguba waad wada shaqeynaysaan.

Shaqaalaysiinta: Waxaad dooranaysaa shaqaalahaaga. Wakaaladdu waxay kaa caawinaysaa waraaqaha.

Maareynta taageerada: Adiga iyo wakaaladuba si wadajir ah ayaad u maamulaysaan shaqaalaha.

Tababar iyo kormeer: Adiga iyo wakaaladdu ayaa tababaraya oo kormeeraya shaqaalaha. Wakaaladdu waxay dhageysaneysaa ra'yigaaga.

Wakaaladda Moodada Caadiga ah

Wakaaladdu ayaa wax walba kaa caawinaysa.

Shaqaalaysiinta: Wakaaladdu waxay qortaa shaqaale si ay u buuxiyaan baahiyahaaga. Haddii aad rabto, waad caawin kartaa.

Maareynta Taageerada: Wakaaladda ayaa dejisa jadwalada, raadisa shaqaale kayd ah, la socota horusocodka, oo qorshaysa hawlaha.

Tababar iyo kormeer: Wakaaladdu waxay tababartaa oo kormeertaa shaqaalaha. Caawimaad ayaad ka heli kartaa kormeere markii aad rabto.

Dokumeentigan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, far waaweyn, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidaysid. Kala Xiriir Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korrinka iimaylka odds.questions@odhs.oregon.gov ama 503-945-5811 (wicitaan/fariin gaaban). Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalka ku adag yahay.